



## (Iga gudbiya aniga kulay aayad ku tahay, reer Banii Israa'iilna ka sheekaya dhib kuma jiree, qofka si kas ah iigu been abuurta ha u diyaar noqodo booskuu naarta ka fariisan lahaa)

Cabdullaahi Binu Camar waxaa laga wariyey Allaha ka raali ahaado isaga iyo aabihiye inuu Nabigu scw yiri: (Iga gudbiya aniga kulay aayad ku tahay, reer Banii Israa'iilna ka sheekaya dhib kuma jiree, qofka si kas ah iigu been abuurta ha u diyaar noqodo booskuu naarta ka fariisan lahaa).

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Albukhaari]

Nabigu scw wuxuu amrayaa in cilmiga kitaabka iyo sunada laga gaar siiyo dadka, in yarba ha ahaadee sida aayad quraana ama hal xadiisa, waxaana shardi ah inuu yaqaan waxa uu gaarsiinaayo oo uu dadka ugu yeerayo. Nabigu scw wuxuu cadeeyey inaan dhib ku jirin ka sheekaynta reer Banii Israa'iil wixii ku dhacay ee ay soo mareen waase wixii aan diinteena ka hor imaanayn. Nabigu scw ka dib wuxuu ka digay qofkii si kas ah ugu been abuurta inuu naarta ka diyaarsado guri.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3686>

